

Qaladaadka Caadiga ah

Waxaa dhici karta inaad maqashay in 80% ee gawaarida caruurta si qaldan loo rakibo. Tan waa wax laga argagaxo, laakiin qaladaadka caadiga ah waa kuwo fudud oo si sahlan loo toosin karo.

Dhibaatada: Ka-soo furidda canugga xarigga dambe ee kursiga oo si dhaqsiya leh loogu xirayo xarigga hore.

Xalka: Caruurta ku hay kursiga ammaanka ee dambe ee gaariga oo loogu talagalay illaa ay ka gaarayaan culayska ama joogga ugu sarreeya ee ay oggoshay warshadda sameeysa kuraasta badbaada gaariga (American Academy of Pediatrics oo ku talinaya in caruurta lagu hayo kursiga dambe illaa 2 sano jir haddii ay suurtagal tahay).

Dhibaatada: Biinanka suunka celiya si weyn ayay u dabacsanyihiin.

Xalka: Dhuuji biinanka suunka celiya si ay si waasac ugu ahaadaan cunuga.

Dhibaatada: Biinka celiyaha ee xabadka aad ayuu u hooseyaa.

Xalka: Biinka hoos riix ilaa ay la sinnaadaan kilkaha.

Dhibaatada: Kursiga gaariga ee cunugga aad ayuu u dabacsanyahay.

Xalka: Kursiga waa inusaan ka dhaqaaqin meesha wax ka badan hal inji horay iyo gadaal iyo gees ka gees. Haddii uu sidaa noqdana, qofkale hoos si adag ha ugu riixo inta aad adiga suunka gaariga ku adkaynaysid. Haddii kursiga uu yahay mid horay u jeeda, marka lagu daro adkeyaha u sarreeya ayaa ku caawinaya inuusan nuuxsan.

Dhibaatada: Canuggu wuxuu ku jiraa kursi khaaldan marka cabbirkiisa loo eego.

Xalka: Hakula degdegin canuggaada in aad saartid kursiga wayn ee gaariga ama sunka kursiga. Raac tilmaamaha buugga tusmda ee calaamadaha kursigaag ku qoran ee culayska iyo joogga inta uu la egyaha.